

## Isku-xirnaanta Caa-iladda

Dalka Ameerika waxaa u degsan sharciyo adag oo ku saabsan khilaafaatka ka dhex dhaca caailadda kuwaasoo keeni kara in carruurta guriga laga kaxeeyo, labadii dhalayna xabsiga lagu rido ama la musaafuriyo xataa haddii kuwii dhibaataadu ku dhaacday ay diidaan inay markhaati ama marag furaan.



**Carruurta oo lagu Xad-gudbo:** Waxaa looga jeeda marka labada waalid midkood ilmo yar jirkiisa dhaawac u geysto ama qofka masuulka ka ah ilmaha ilaalintiisa ama qof ka mid ah dadka guriga deggan ama caailadda ka tirsan ka dibna ay caddaato in ilmaha caafimaadkiisa iyo daryeelka noloshiisa si weyn dhibaato ugu dhacdo ama uu u dhowaado inuu khatar galo; ama la faraxumeeyo oo jirkiisa dhaawac gaaro ama yuusan gaarin.

Cunug yar oo la faraxumeeyay waxaa loola jeedaa faraxumayn galmo la xiriirta ama ka faaiidaysi loo geysto ilmo saqiir ah waxaana soo hoos gelya salaaxid (taaabasho aan la rabin), iyadoo loo galmoodo qof aan sharci ahaan la guursan gkarin, kufsasho, heer kasta oo dembi galmo ah, galmo xagga dabada ama duburta ah iyo fal kasta oo aan caadi ahayn oo ku lug leh anshax xumo iyo faasiqnimo.

**Ilmo Dayacid:** Waxaa loola jeedaa marka laba waalid ama qofka ilmaha ilaaliyaa ama ilmaha masuulka ah uu ka baaqdo inuu daryeelkii loo baahnaa siin waayo ilmaha waxaana ka mid ah in ilmaha yar laga tago iyadoon cidina ilaalilayn oo markaas caafimaadkiisii ama hab nololeedkiisii si weyn dhibaato u gaarto ama khatar la geliyo.

**Rabshadaha Qoyska ka Dhex-Dhaca:** Rabshadaha guriga ama rabshadaha qoysku waxaa weeye awoodda oo si xun oo xad gudub ah loo is-ticmaalo. Xaaladahan oo kale waxay dhacaan marka qof qof kale uu korka ka qabsado ama kontoroolo isaga oo adeegsanaya xoog ama hanjabaad. Gacan ka hadluhu wuxuu go'aan ku gaaraa inuu qof wax ku dhufto ama garaaco ama laado ama feer ku dhufto ama u hanjabo qofka dhibta loo geystay. Rabshadaha guriga waxaa kale ka mid ah weerar jirka loo geysto iyo weerraro galmo iyo hanjabaado. Falalkan gacan ka hadalka ahi waa falal dembi qofkii ku kacana wuxuu mudanayaa dembi ku oogid iyo ciqaab marin. Falalka noocaas ahi waa falal looga jeedo in qofka dhibbanaha ah ra'yigiisa, shucuurtiisa iyo dabeecaddiisa lagu xakameeyo. Falalka gacan ka hadalka ahi ma aha kuwo nuqsama ama sii yaraadaa marba marka ka danbeeya. Hanjabaadda iyo / ama farasaarku marar badan bay dhacaan muddo dheerna way sii socdaan waxayna sababaan dhaawacyo weyn oo jirka gaara.

Shucuurta qofka oo lagu xadgudbo iyo caydu waxay hod iyo goor qayb ka yihiin hab – dhaqanka kuwa dadka ku xad-gudba. Hase yeeshee, falalka noocaasi ahi ma aha falal dembi. Laakiin dhaawayada iyo waxyeelooyinka afxumadu ay qofka u geysato way aadag tahay siduu uga bogsado.

Rabshadaha guriga ka dhaca sabab uma aha daan daansi ama falal uu sameeyay ama uusan samaynin qofka dhibbanaha ah. Rabshadaha qoyska ama guriga waxa si toos ah sabab u noqda ma aha khamri ama maandooriye, buufis, fardo marnaan, shaqo la'aan, jirro maskaxeed ama xadgudub qofka lagu sameeyay markuu yaraa. Si kastaba ha ahaatee, mashaakilka jiraa badanaa waxay abuuraan buuq badan oo waxyeello u geysta xiriirka dadka u dhexeeya waxaana laga yaabaa inay khatarta rabshaddu sii badato. Xad-gudbayaal badani waxay eedda saaraan dhibbanaha ama waxuun kale mana qaataan masuuliyadda falalka xun ee ay ku kacaan. Gacan ka hadalku weligiis cudur daar ma leh.

Haddaad tahay dhibbane lagu xad-gudbay, waxaad taageero ka heli kartaa hay'adda wadaniga ah (**National Domestic Violence**) ee u xilsaaran rabshadaha guriga ka dhaca waxaadna kala hadla kartaa telifoonkooda xaaladda deg deg **1-800-799-7233**. Halkaas waxaa diyaar ku ah taageero iyo luqado lagu hadlo oo badan.

Sharciga u dhigan farasaarka dumarka wuxuu u ogolaanayaa xaaska lagu xad-gudbay iyo caruurteeda muwaadiniin maraykan ah iyo kuwa dalka si sharci ah u deggan inay codsi ama arji qoraan si ay u helaan sharci degganaansho daaim ah.

**Cawaaqibta Socdaalku Keeno:** Waxaa jirta cawaaqib xumo ka dhalata socdaalka uu ka mid yahay (musaafuris) la musaafuriyo dadka falal xad-gudub ah kula kaca carruurta iyo dayacid iyo gacan kahadal guri. Haddii adigu shakhsi ahaan ama qof aad taqaanid uu ku lug leeyahay xad-gudub lagu samaynayo xubin qoyska ka tirsan, waxaad heli kartaa caawimaad, rabshaddana waad joojin kartaa. Haddii aad u dhowdahay inaad qof ku xad-gudubtid, waxaad wacdaa hay'adda wadaniga ah ee ku shaqo leh rabshadaha guriga kana wac telifoonka ah **1-800-799-7233**. Waxaa jira barnaamijyo lagula taliyo shakhsi keli iyo kuwo koox lagula taliyo..